

Bixinta adeegyada ku saabsan horumarinta caafimaadka

- ee loogu talagalay carruurta iyo waalidiintooda

Carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay helaan caafimaadka ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah. Si kor loogu qaado carruur iyo waalidiin ladan iyo in loo fidiyo taageerada ay dhici karto inay u baahan yihiin ee arrintan, dhammaan qoysaska oo dhan waxaa loo fidiyaa taageero ku aaddan adeegyo kala duwan inta lagu jiro sannadka koowaad ee ilmaha. Adeegyada kor u qaadida caafimaadka iyo taageerada waalidka ee laga bixiyo xarunta caafimaadka carruurta, adeegyada dugsiga barbaarinta, daryeelka ilkaha iyo adeegga bulshada.



▶ XARUNTA CAAFIMAADKA EE ILMAHA

Marka ilmahaagu dhasho, Xarunta Caafimaadka Ilmaha (Barnvårdscentralen, BVC) ayaa adiga kula soo xiriiri doona si aad u ballansato booqashadaada ugu horreysa. Sidoo kale adiga ayaaba xitaa xarunta la soo xiriiri kara. Xarunta Caafimaadka Ilmaha waa adeeg bilaash ah oo la siiyo dhammaan carruurta oo dhan. Xarunta ilmaha, waxay la socon doonaan caafimaadka ilmahaaga iyo korriinka oo waxayna ku siin doonaan talo iyo taageero ku salaysan baahiyahaaga gaarka ah. Waxaad ballan joogta ah ka qabsan doontaa xarunta ilaa ilmahaagu ka bilaabay fasalka barbaarinta (förskoleklass). Xarunta Daryeelka Caafimaadka Ilmaha waxay fidiyaan tallaalo iyo baaritaanno loogu tagalay caafimaad ilmahaaga. Baaritaannada caafimaadka waxaa loogu talagalay inay xaqiijinayaan in ilmahaagu caafimaad qabo oo uu si habboon u korayo. Markastaaba waxaad kula kulmi doontaa kalkaaliso joogta xarunta, oo mar marna waxaa joogi doona dhakhtar, sidoo kale. Dhammaan shaqaalaha jooga Xarunta Daryeelka Ilmaha waxaa saaran waajibaad ku aaddan asturnaanta xogta.



▶ DUGSIGA HORE

Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuu dhigto ama tago dugsiga barbaarinta laga bilaabo hal sano haddii waalidka yahay mid shaqeeya, waxbarasho ku jira ama shaqo raadis ah. Dhammaan carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsiga barbaarinta (förskolan) oo bilaash ah laga bilaabo da'da saddex jirka. Waxbarashada dugsiga barbaarinta waa inay noqotaa mid madadaalo leh, ammaan ah oo wax barasho u leh dhammaan carruurta oo dhan. Macallimiinta iyo xannaaneeyayaasha ka shaqeeya dugsiga barbaarinta ayaa ilmahaaga taageeri doona oo daryeel doona ilmahaaga si ay u koraan, u ciyaaraan oo ay wax la bartaan carruurta kale.

Degmooyin badan ayaa sidoo kale leh dugsigo barbaarin oo furan (öppna förskolan) kaas oo lagu soo dhawaynayo in ilmahaaga aad kala soo qayb gasho.



▶ ADEEGYADA CAAFIMAADKA ILKAHA

Marka ilmahaagu jiro inta u dhaxaysa hal ilaa saddex sano, waxaa la siin doonaa ballanteeda ugu horreysa ee adeegyada daryeelka ilkaha (tandvården). Ilmahaaga si joogto ah ayaa markaa loogu yeeri doonaa ballan, iyada oo ay ku xirnaan doono heerka caafimaadkiisa afka. Carruurta uu ku dhaco cudurrada iligga goor hore ee noloshooda waxay halis ugu jiraan caafimaad darro iyo nolol tayo liidata. Dhammaan daryeelka ilkuhu waa bilaash ilaa laga gaarayo da'da 23 jir.

▶ ADEEGYADA BULSHADA

Adeegyada bulshada ee degmadaada (socialtjänsten) ayaa kuu diyaar ah in ay adiga iyo ubadkaaga idin caawiyaan.

Waxaad adeegyada bulshada waad la xiriiri kartaa haddii:

- Aad u baahan tahay qof aad kala hadasho waalidnimadaada.
- Aad ka welwelsan tahay ilmahaaga ama aad taageero u baahan tahay
- Ay kugu adag tahay inaad xad u samayso, ama ay jiraan isku dhacyo joogto ah ilmahaaga
- Xaaladaadu waa adag tahay, haddii ay jiraan balwad ama rabshad qoyska dhexdiisa ah
- Aad u baahan tahay taageero dhaqaale si aad qoyskaaga u daryeesho
- Aadan ku raacsanayn waalidka kale waxyaabo khuseeya arrimaha carruurta
- Ubadkaaga wuxuu u baahan yahay taageero dheeraad ah sababo naafonimo la xiriirta darteed

Sidoo kale adeegyada bulshadu waxay ku dadaalaan inay ilaaliyaan oo ay caawiyaan carruurta dhibaataysan. Qof kasta oo ilmo ka welwelsan wuxuu la xiriiri karaa adeegga bulshada oo way soo sheegi karaan welwelkooda.



Faahfaahinta Xiriirka

Adeegga:

Adeegga:

Adeegga:

Adeegga:
